

**Somali | Lifaqa A: Xog-ururinta Isticmaalka Luuqadda**

Waaliddiinta iyo Masuulada: Fadlan kaliya dhammaystir boggan xog-ururinta. Gadaasha foomkan waxa dhammaystiraya dugsiga. Xog-ururinta luuqadda oo dhammaystiran waxa laga rabaa dhammaan ardayda markii ay isku qoraan dugsiyada Ohio. Macluumaadkan waxay u sheegi doonaan shaqaalaha dugsiga haddii ay u baahan yihiin inay hubiyaan sida ilmahaagu luuqadda Ingiriisida ku yahay. Jawaabaha su'aalaha waxay xaqiijiyaan in ilmahaagu helo adeegyada waxbarashada si uu dugsiga ugu guulaysto. Macluumaadkan looma isticmaalo in lagu garto xaaladda muhaajirimo (socdaalka) ee qofka.

<b>Magaca Ardayga:</b> <i>(Magaca Hore iyo Magaca Dambe)</i>	<b>Taariikhda Dhalashada Ardayga:</b> <i>(bisha/maalinta/sanadka)</i>
<p><b>Doorashooyinka Wada-xiriirka</b> Sheeg luuqadda aad doorbidayso si aanu kuugu diyaarin karno tarjumaan ama waraqaq tarjuman oo lacag la'aan ah markii aad u baahato. Dhammaan waaliddiintu waxay xaq u leeyihiin inay ku helaan macluumaadka ku saabsan waxbarashada ilmahooda luuqad ay fahmayaan.</p>	<p>1. Waa maxay luuqadda qoyskaagu doorbidi lahaa inuu dugsiga kula xidhiidho? _____</p>
<p><b>Taariikhda Luuqadeed</b> Macluumaadka ku saabsan taariikhda luuqadeed ee ilmahaagu waxay naga caawinaysaa inaanu aqoonsano ardayda u qalanta taageero si loo kobciyo xirfadahooda xagga luuqadda ee daruuriga u ah guulaysiga dugsiga. In imtixaan laga qaado ayaa muhiim noqon karta si loo go'aamiyo haddii taageero xagga luuqadda ah loo baahan yahay.</p>	<p>2. Waa maxay luuqadda ilmahaagu ugu horrayn uu bartay? _____</p> <p>3. Waa maxay luuqadda ilmahaagu uu inta badan ku hadlo marka guriga uu joogo? _____</p> <p>4. Waa maxay luuqadaha lagaga hadlo gurigaaga? _____</p>
<p><b>Waxbarashada Hore</b> Jawaabaha ku saabsan waddanka ilmahaagu ku dhashay iyo waxbarashada hore waxay na siinaysaa macluumaad kusaabsan aqoonta iyo xirfadaha ilmahaagu la imanayo dugsiga oo awoodsiin kara in dugsigu helo maalgalin dheeraad ah si loo taageero ilmahaaga.</p>	<p>5. Waa maxay waddanka ilmahaagu ku dhashay? _____</p> <p>6. Ilmahaagu waligii ma ku helay waxbarasho toos ah dibadda Maraykanka? <input type="checkbox"/> Haa    <input type="checkbox"/> Maya Haddii ay haa tahay, imisa sano/bilood? _____ Haddii ay haa tahay, waa maxay luuqadda wax lagu bari jiray? _____</p> <p>7. Ilmahaagu dugsiga ma ka dhigtay Maraykanka? <input type="checkbox"/> Haa    <input type="checkbox"/> Maya Haddii ay haa tahay, goorma ayuu ilmahaagu markii ugu horraysay xaadiray dugsiga ku yaala Maraykanka? _____/_____/_____ Bisha    Maalinta    Sanadka</p>
<p><b>Macluumaad Dheeraad Ah</b> Fadlan nala wadaag macluumaad dheeraad ah si ay nooga caawiyaan inaanu fahamno waayo-aragnimada xagga luuqadda iyo taariikhda waxbarasho ee ilmahaaga.</p>	
<p>Magaca Hore ee Waalidka/Masuulka: _____      Magaca Dambe ee Waalidka/Masuulka: _____</p> <p>Saxeexa Waalidka/Masuulka: _____      Taariikhda Maanta: <i>(bisha/maalinta/sanadka)</i> _____</p>	

Waad ku mahadsan tahay bixinta macluumaadka kore. La xidhiidh dugsigaaga ama xafiiska degmada haddii aad qabto su'aalo ku saabsan foomkan ama ku saabsan adeegyada laga heli karo dugsiga ilmahaaga. Macluumaad tarjuman oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka madaniga ah ee dugsiyada ee ardayda Ingiriisiga barta iyo waaliddiinta Ingiriisigoodu xaddidan yahay waxa laga heli karaa halkan: <https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/ellresources.html>



(LIFAAQA A, sii socda)

**\*\*\*WAXAA DHAMMAYSTIRAY SHAQAALAHA DUGSIGA\*\*\***

- Sax saar.** Xaqiiji bayaannada soo socda ee la xidhiidha maamulka xog-ururinta isticmaalka luuqadda ee Ohio:
  - Degmada ama dugsigu wuxuu ugu soo bandhigay xog-ururinta isticmaalka luuqadda, ilaa intii macquul ah, luuqad iyo qaab waalidka ama wakiilku fahmay.
  - Degmada ama dugsigu wuxuu ku wargeliyey waalidka ama wakiilka ujeedada foomka. Xogururinta isticmaalka luuqadda waxa kaliya loo isticmaalaa in lagu fahmo waayo-aragnimada luuqadeed iyo taariikhda waxbarasho ee ardayda.
  - Degmada ama dugsigu wuxuu ku soo tabiyaa (gudbiyaa) macluumaadka xog-ururinta isticmaalka luuqadda hab ku haboon ee Nidaamka Macluumaadka Maaraynta Waxbarashada (EMIS).
  - Ardayda diiwaangashan ee ka socda dugsiyada iyo degmooyinka kale ee Maraykanka, shaqaalaha dugsigu waxay codsadaan xogta xog-ururinta luuqadda oo hore waxayna tixraacaan macluumaadka marka ay aqoonsanayaan ardayda Ingiriisiga barata.
  - Natijoooyinka xog-ururinta isticmaalka luuqadda waxa lagu ilaaliyaa diiwaanada ururinta ardayga, waxayna u raaci ardayga haddii uu u beddesho degmo ama dugsi kale.
- Fiiro gaar ah.** Diiwaangali macluumaad dheeraad ah si ay kaaga caawiyaan dib-u-eegista xogururinta isticmaalka luuqadda.
- Diiwaangalin.** Ku muuji jawaabaha xog-ururinta isticmaalka luuqadda shaxda hoose.  
Tixraac [Faallooyinka Xog-ururinta isticmaalka luuqadda](#) ee bogga 2 si aad u hesho hagid shay ugaar ah.

<b>Luuqadda ardaygu u dhashay</b> Fiiri Su'aasha 2 ee Xog-ururinta Isticmaalka Luuqadda. Warbixin ku <a href="#">saabsandhammaan</a> ardayda kujira EMIS.	_____
<b>Luuqadda guriga ardayga</b> Fiiri Su'aasha 3 ee Xog-ururinta Isticmaalka Luuqadda. Ka warbixi <a href="#">kaliya</a> ardayda Ingiriisiga barta ee kujira EMIS.	_____
<b>Ardayga Ingiriisiga baran doona</b> Fiiri Su'aasha 2-4 ee Xogururinta Isticmaalka Luuqadda.	<input type="checkbox"/> Haa. Qiimee sida ardaygu Ingiriisiga ku yahay. <input type="checkbox"/> Maya. Ha qiimayn sida ardaygu Ingiriisiga ku yahay.
<b>Xaaladda muhaajirnimo ee ardayga</b> Fiiri Su'aasha 5-7 ee Xogururinta Isticmaalka Luuqadda. Ka <a href="#">warbixidhammaan</a> ardayda kujira EMIS.	<input type="checkbox"/> Haa, ardaygu waa ilme muhaajir ah. <input type="checkbox"/> Maya, ilmuhu ma aha mid muhaajir ah.

- Qiimee.** Dhammaystir macluumaadka hoose.

\_\_\_\_\_

Saxeexa shaqaalaha dugsiyada ee qiimaynta

\_\_\_\_\_

Taariikhda (bisha/maalinta/sanadka)

\_\_\_\_\_

Magaca daabacan ee shaqaalaha dugsiyada ee qiimaynta samaynta

\_\_\_\_\_

Magaca dugsiyada ama degmo dugsiyeedka